

Waxaanu ka hadlaynaa saxarada iyo calool istaaga



Buugani waxaa loo soo saaray si loo caawiyo caruurta yar yar inay fahmaan sababaha keenay calool istaaga iyo saxarada oo soo dhaaftha (marka qofku isku xaaro).

Buugan wuxuu sharaxaa sababta tani u dhacdo iyo waxa qofku samayn karo si xaaladan loo fiicnaysiiyo.

Waa muhiim in la xusuusto in haddi ilmaha ay soo dhaafto saxarada ay dhici karto in ilmahani ay calooshu taagnayd dhowr bilood oo cidina aanay ogayn arrintan.

Way jirtaa caawimaad. Daryeelidani badanaaba wakhti ayay qaadata ka hor intaanay wax tar keenin. Daryeelidani waa inay socotaa wakhti dheer (badanaaba dhowr bilood) si looga hortago in calool istaagani soo noqdo.



Waa muhiim in **laga hadlo** dhibaatadan **calool istaaga** iyo saxaro qofka soo dhaafta.


Maaha inay ahaato wax la qariyo.

Halkee ayay saxaradu ka soo baxda?

Dadka oo dhan waa inay kaajaan oo saxaroodaan. Saaxiibadaa oo dhan, hoyadaa iyoaabahaa, xitaa ciyaar-yahanada iyo heesaaga caanka ah waa inay kaajaan oo saxaroodaan.

Marka aynu wax cuno waxaa jirta mar kastaba qayb ka mid ah cuntada oo jirkeenu aanu u baahnayn.

Sidaas darteed jirku wuxuu iska saaraa cuntada soo hartay. Taasi waa saxaradeena!



Mararka qaarkood waxay saxaradu
"ku istaagtaa" dabada.


Waa maxay calool istaagu?

Calool istaag micnaheedu waa in aanad u saxaroon si kugu filan, ama in saxaradaadu noqotay adayg, tani oo keentay inay adkaato inay soo baxdo.

Sidee ayaa calool istaagu noqdaa?

Mararka qaarkood ma garanayno sababta tani u dhacdo, laakiin waxaynu ognahay dhowr sababood oo keena in saxaradu noqoto mid adag:

- Cunida aad u yar dhinaca khudaar iyo khudaarta cagaarka ah
- Cabitaan aad u yar
- Fariisid la'aanta wakhti kugu filan godka musquusha
- Tegitaan la'aanta musquusha marka qofku u baahdo



Isku day in la saxaroodo maalin kasta.

Sidee ayaan isaga joojin karaa inaan ku xaaro surwaalka?

Waa inaynu iska saarno saxarada ku fadhibaado dabadaada waayo waxay sababtaa dhibaato.

Adigu waad caawin kartaa iyadoo:

- Si joogto ah loo tago musqusha oo la isku dayo in la saxaroodo maalin kasta
- La fariisto godka musqusha 5 - 10 daqiico oo la isku dayo in banaanka loo "cadaadiyo" saxaradan (cashada ka dib ayaa badanaaba ugu fican)
- In aanad isku heyn haddii aad dareento in xaar ku hayo
- Cabtid dhowr koob oo biyo ah maalin kasta
- Cuntid khudaar iyo khudaar cagaar ah oo badan
- Dhaq-dhaqaaq badan samaysid
- Qaadatid dawooyinka "caloosha jilciya"



Calool istaag micnaheedu waa in ay
adagtahay in saxaradu ay soo baxdo!

**Waa maxay sababta xaarku keligii
ugu soo baxayo kalsoonkayga/
dharkayga hoos gashiga?**

Marka calooshu ku taagantahay wuxuu xaarku ku fariistaa oo ku haraa dabada halki uu u bixi lahaa musqusha. Xaarku wuu sii bataa, sii adkaadaa oo cadaadis sameeyo, markaasna waxaa furma in yar oo ka mid ah daloolka xaarka. Daloolkani badanaaba wuu xiranyahay sida "albaab" ilaa inta qofku tagayo musqusha.

Waxaa jirta qayb qaloocan oo ku taala dhamaadka mindhicirka taas oo xitaa caawimaad ka gaysata in xaarka lagu hayo meeshiisa. Marka qofka calooshu taagantahay qaybta qaloocan ee mindhicirka ayaa toos noqota oo sidaasi ayaa xaarka dareeraha ah ee ku jirta xagga sare ee kor ay u awoodaa inay soo dhaafsto dharkaaga.
- "xaar been-been ah".



**Waxaa jira wax badan oo adigu aad samayn
karto si loo fiichnaysiiyo arrintan oo dhan.**

Maxaa dheeraad ah ee aan anigu samayn karaa si aan isu caawiyo?

Yeelo wakhti go'an maalin kasta taas
oo adigu kuugu fiican inaad ku fariisato
musquusha oo isku daydo inaad xaarto
(waxaa ugu fiican cashada ka dib).

Meel ku qor markaad musquusha ku soo xaarto
si aad adigu ugu sheegto qofka ku caawinaya.

Kula heshii mid ka mid ah waalidka (ama
qofka ku daryeela) waxa aad ku samaynaysid
dharka "xaar been-been ahi" ku jiro.



Xaarku wuxuu doonayaa inuu
u soo baxo **musquusha**.

Halkan waxaa ku qoran magaca qofka kaa
caawin kara in aad ladnaato.

Magaca:

.....

Telafoon lambarka:

.....

QORAALO:

Buuga saxarada waxaa qoray June Rogers MBE, Agaasimaha PromoCon, Disabled Living Centre Manchester waxaan u turjumay iswiidhish Dhakhtarka caruurta ee Marie Keillar iyo Dhakhtarka kaadi-mareenka ee Inger Jansson, Isbitaalka caruurta, NÄL, Trollhättan.

Sawirada waxaa sameeyay Les Eaves

Lama oggola in qayb ka tirsan dokumentigan la koobiyeeyo ama la faafiyo iyadoo aan la haysan oggolaanshaha qoraaga.

www.promocon.co.uk © PromoCon Disabled Living, 2004

